islaamtay

Xakiim Binu Xisaam Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Waxaan iri: Rasuulka Ilaahayow, iiga waran waxyaabo aan ku cibaadeysan jirey waagii Jaahiliga, sida: Sadaqada, xoraynta Adoomada, iyo xiriirinta qaraabada ee ajar ma ka helayaa? Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri:" wixii khayr ahaa ee aad horay u samaysay ayaad ku islaamtay".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey hadii gaalku Islaamo in laga ajar siinaayo camalkiisii wanaagsanaa ee waqtigii Jaahiliga ee Islaamka ka hor uu sameeyey, sida sadaqada, xoraynta Adoomada iyo xiriirinta Qaraabada.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/65016